



# Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo biilka korantada ee gurigaaga? Wac (206) 727-8400

**Seattle City Light waxay halkaan u joogtaa inay ku caawiso inta lagu jiro aafada COVID-19 umana xirayso korantadaada sababo la xariira inaad bixin kharashka korantada.**

## Maxaan kuu sameyn karnaa

*Laguguma xiraayo inaad tahay muwaadin lagumana waydiinaayo inaad keentid lambarka Social Security si aad u heshid adeegyadaas.*

- Waxaan kaa caawinaynaa inaad codsatid Utility Discount Program (UDP, Barnaamijka Dhimista Adeegyada) qiimo dhimis dhan boqolkiiba 60% ee biilka korantada iyo dhimis dhan boqolkiiba 50% ee biilka biyaha ee gurigaaga/wasakhda/qashinka haddii aad tahay macaamiisha u qalma dakhliga.
- Waxaan baajin karnaa biilkaaga korantada si aad xili danbe u bixisid waxaana kaala shaqayn doonaa abuurista qorshaha qarash bixinta.
- Ka jawaab su'aalaha biilka korantadaada.
- Isticmaal quwadda keydinta tamarta si aad u tashiilato lacagta korantada.

**QIIMO DHIMIS**

 **60%**

 **50%**

## WAXAA DIYAAR AH TURJUMAAN

- Marka aad nasoo wacdid, waxaad la hadli kartaa qof caadi ah ama waxaad noosoo duubi kartaa cod.
- Haddii qof uu kaa qabto, ku sheeg luuqada aad u baahan tahay af Ingiriisi.
- Haddi aad cod noosoo duubayso cod ama aad iimayl noosoo dirayso, fadlan noosheeg magaacaga, lambarka taleefoonka, luuqada aad u baahan tahay adoo ku sheegaya af Ingiriisi iyo caawimaada aad u baahan tahay.



## NAGALA SOO XARIIR

**CUSTOMER ADVOCACY TEAM (KOOXDA XALINTA CABASHOYINKA MACAAMIISHA)**

**Soo wac: (206) 727-8400**

**8 am–5 pm, Isniinta–Jimcaha**

**Iimayl udir: [CityLightHelp@seattle.gov](mailto:CityLightHelp@seattle.gov)**

**Macaamiisha ganacsiyada Yaryar:** Naga soo wac (206) 256-5200 si aad wax oga ogaatid dookhyada lacag bixinta iyo qiimeynta tamarta bilaashka ah ee aad u adeegsan karto ganacsigaaga.



**Seattle City Light**

[seattle.gov/light](http://seattle.gov/light)

